Casharka 1-aad: Qoraal sharaxeed

1. Qoraalka sharraxaadda xaggee laga helaa?
   Waxaa laga helaa buugaagta Sayniska, kuwa xogaha lagu uruuriyo, boorarka xayaysiinta iwm.
2. Maxay ku dhisan yihiin inta badan aqoonta Sayniska?
   Aqoonta Sayniska waxay ku dhisantahay sharraxaad.
3. Maxay ururisaa aqoonta Sayniska?
   Aqoonta Sayniska waxay ururisaa war iyo wacaal laga soo xigtay adduunka innagu xeeran.
4. Maxay ina siisaa sharraxaadu?
   Sharraxaaddu waxay ina siisaa warka iyo waayaha walxaha carro-edeg.
5. Immisa heer ayey martaa qoraalka sharraxaada? Kala sheeg?
   Qoraalka sharraxaadda saddex heer ayey martaa.
   - Waa in ay jirtaa xaalad u baahan in runnimadeeda la cadeeyo.
   - In sheegashada loo raadiyo caddeyn
   - In la sababeeyo.
6. Waa maxay sheegasho?
   Sheegasho waa weero ka af-naqayo adiga kasmadaada.
7. Xaggee bay ka imaan karaan sheegashada caddeemaheeda?
   Sheegashada cadeemaheeda waxay ka imaan karaan daliil ama xadiis.
8. Yaa leh adayg aan diismayn?
   Adayg aan diismayn waxaa leh saabuunta.
9. Waa maxay qoraal sharaxeed?

Qoraal sharaxeed waa waxa soo kooba walxaha sida sheegasho, cadeyn, sababta

10. Imisa heer waye qoraal sharaxeed?

Waa saddex heer

1. Maxa soo koobi kara walxaha?
2. Waxaa soo koobi karo sheegasho + cadeen + sabab
3. Maxaan ku cadeyn karaa sheegashada?

Waxaan ku caddeyn karaa aqoon horay loo heystay.

4. Bare c/salaam muxuu ardada weydiiyay?

   Wuxuu weydiiyey heerarka jadwalka ee uu walxaha kasameysan yahay

5. Sheeg sharaxaada abyan ee qoraal sharaxedka?

   Waa sheegasho+ cadeyn + sabab

   Isu beeg sharaxaad iyo erayadaan soo socoda

Tiro	Sharaxaad		Erayo
1	Amakaag , ashqaraar , cajiib	7	Muun
2.	Dhagac , cagaha wax ka day ,carar, firxasho	8	Muuno
3.	Yaadad, kashiito,dhido	5	Soongur
4.	Tukulush	9	Naylo
5.	Bahal yar oo dabagaalaha u eg	3	Caanaqub
6.	Dameerka yar	10	Baraar
7.	Dameerka labka ah	1	Yaab
8.	Dameerta dheddiga ah	2	Yaac
9	Idaha yar yare ee ka kooban dhedigga iyo lab	4	Dabagaalle
10	Idaha koray oo naylo dhaafay lax iyo wanna	6	Qeyl

Keen Erayadaan soo socda lidkooda iyo eray la micno ah

Tiro	Ereyga	Lidka	Eray la micno ah
1	Fanasho	Farad	Reen reer
2	Buubaal	Degasho	xasilid
3	Horweyn	Irmaan	Caano badan
4	Galoof	Xaas	Reer
5	Har	Ciriid	Jog
6	Kul	Qabow	Dhaxan
7	Lax	Wan	Ido
8	Caro	Hayin	Toosan
9	Gaari	Baali	Mayd
10	Dhurow	Dhimo	Dug

Ku qor erayadaan soo socda micno kale

Tiro	Eray micno badan	Micno kale
1	Saymo	Qaanso,sagal,falaar
2	Aar	Libaax,aarsasho, geesi
3	Aas	Duugid,xabaalid,qoraxdhac
4	Aaran	Barwaaqo, qeelo,doog
5	Addin	Cajirka , boowdo, yeerid
6	Aduun	Dhul, ifka, duni
7	Af	Dul . dhinac , waddo, tog
8	Afti	Cadeen , bandhig, kalasoocid
9	Agool	Qandhicil , qof madax cad
10	Alkun	Doonis , gabadh , soosaarid

Isku beeg erayada doolka iyo erayga asalka

Erayga doolka	**Asalka**	**eraygalodka**
1. duhur	Wirwir	Saqdhexe
2. Suaal	Weydiimo	Warcelin
3. Shay	Wax	Waxba
4. Rafiiq	Weel	Kali
5. Tacliin	Waxbarasho	Jaahil/ aqoondari
6. Qaanuun	Xeer	Is dhaxyac
7. Naf	Xaw	Dhimasho
8. Qiyam	Xeerdahsoon	Dulinimo

Casharka: 2aad Beeraha

1. Haddii diraacdu dheeraato maxaa dhacaya?
   Xoolaha ayaa la le'anaya baad iyo biyo la'aan.
2. Xoolo dhaqatada marka xoolahooda uu ku dhaco cudur iyo cashi maxaa la yiraah?
   Waxaa la yiraah hebel xoolihiisa waxaa ku habsaday wahab.
3. Maxaa la yiraah qalabka dibida beeraha lagu fasho oo dhammeystiran?
   Waxaa la yiraah MEERAR
4. Labada dibi ee beerta lagu fasho maxaa la yiraah?
   Waxaa la yiraah Qindi.
5. Rooble iyo Xirsi maxay ahaayeen?
   Waa labo nin oo xoolo dhaqato ah oo deegaankooda ay haleeshay abaar aad u daran.
6. Xirsi xaggee bay ahayd meesha uu reerku u degenaa?
   Xirsi reerkiisa waxay degenaayeen Geedahays.
7. Jeesaska Rooble xaggee degenaayeen xaalkana side ahaa?
   Waxay degenaayeen Ballibaxweyn, xoolahana way ku xaab la'aayeen
8. Dibiyada beeraha lagu fasho midka aan taba barneyn maxaa la yiraah?
   Waxaa la yiraah kanaaf.
9. Dibiga tababaran maxaa la yiraah?
   Waxaa la yiraah xaraasha.
10. Waa maxay saddex qalalan ayuu isku dhuftay nin beeraley ah?
    Saddexda qalalan waa: yaambe, dhul iyo abuur.
11. Waamaxay beer?
    Beer waa asaaska nolasha iyo jiritanka nolasha iyo hormarka

    Waa qodasho dhul iyo beerista geedo iyo wax soosaar

12. Keebaa gar daran hadii ay garsoor ku dhiibtaan nin beeraley ah iyo nin xoololeey ah ma aniga yiri beerta soo daaq?

    Waxaa gar daran ninka xoolo leyda ah sabab too ah beerta ayada loo yimid

13. Sidee dhaqanka Soomaalida ugu tarjumayan waxa dhexmaray Xirsi iyo Geedow

Wuxuu uga tarjumayan inuu geedow yahay nin dhul yaqan ah

14. Safarkii uu rooble ku soo aaday tuuladii oday geedow deganaa sharax kabixi uu ugu faa idey safar kaa?
    Safarkii uu rooble kusoo aadey Tuuladii oday geedow daganaa wxuu ka faa'iidey inuu bartey beer qodis
15. Deegankaaga beer malagu tacbaa?

    Maya dhul ku haboon ma ahan.

16. Dhaqaalaha Soomaalidu keeba ugu wanaagsan beeraha iyo xoolaha?

    Waxaa ku wanaagsan xoolaha

17. Goboladee ugu badan Soomaaliya tacbashada beeraha? Maxaa ugu wacan.

    Waa labada shabeelle waxaana ugu wacan waa dhul udiyaarsan beero

18. Xaggee ugu badan ee laga soo saaraa beeraha Soomaaliya?

    Waxaa laga soo saaraa dhankaa iyo Itoobiya

19. Sidee ugu fiican ee beer lagu tacban karaa meelaha aan wabi marin?

    Waxaa loogu tacbankaraa xareedda iyo matoor.

20. Xaggeese dalaga ugu badan ee Soomaaliya laga soo saaro?

    Waa shabeelada hoose iyo shabeelda dhexe waxa ugu badan waa qutul daruuriga

Isubeeg sharaxaada iyo erayga soo socda

Sharaxaad		**Erayga**
1. Kuu sheekeye ka shekeeye	3	La joojiyaana banana
2. La hel la hal	8	Ismaqabojiyaan
3. Lajiifiyaana banana	6	Ma walaaloowdo
4. Laaf yo aadan udhalan	5	Curdin tahay
5. Laanta toosi intey	7	Iyaga iska kaa oog
6. Labo aan isu waramin	1	Lala ma sheekeysto
7. Labo biyood oo hos iska haran tiyey	4	Lix saamood ma dhafto
8. Laba biyod kulul	2	La waa baa xigta

Erayga	Lidkiisa	Erey lamacno ah
1. Raaxo	Rafaad	Dhib
2. Shilis	Caato	Khaliir
3. Riman	Dhalay	Cusub
4. Irman	Guran	Cano badan
5. Hebed	Toojo	Bayin
6. Guba	Raysin	Deebed
7. Dhimo	Noolow	Waarid
8. Burcad	Baqbeeno	Tuugo
9. Ugub	Curad	Dihan
10. Kadin	Oogo	kore

Keen erayadaan soo socda lidkooda iyo eray kale la micno ah

Erayga iyo eraya la mid ah

Erayga	Micmo badan
1. Maag	Abaarid, duugid
2. Maal	Liis, hanti
3. Maamus	Martisoor, casuumaad
4. Maan	Mug skax , caqli
5. Mar	Bir, lakabyo, Deegan
6. Maax	Nooleye, biyo badan
7. Mac	Lafqab, dhun kasho, caato
8. Maqal	Dagaysi, xisaabiye, maqaayada
9. Mase	Mataal, ekeysiin
10. Mowjad	Hirar qul qul bahsan

Casharka 3-aad: miisaanka maansada

1. Waa maxay qaafiyad?
   Qaafiyadda waa adeegsiga iyo soo celcelinta xaraf isku mid ah.
2. Muxuu leeyahay meeris kasta?
   Meeris kasta oo maanso ku jira wuxu leeyahay xaraf qaafiyadeed maansadu ku socoto.
3. Qor meeris gala ugu yaraan hal xaraf qaafiyadeed?
   Qalinkaa wax suureeya, kugu sima halkaad doonto.
4. Ereyadan ka soo saar kuwa: falka, magaca, tilmaamaha, meeleeyaha.
5. Saacad afnaq cilmi cilmi baaris aroor aw baryo dirqi roorid ganjeel ayaan waalid galbeed hoos kasmo

Magaca	**fal**	**tilmaame**	**meeleeye**
Saacad	afnaq	aroor	galbeed
Cilmi	dirqi	kasmo	hoos
Aw	roorid		

Baryo cilmi baaris
Ganjeel
Ayaan
Waalid

6. Dhowrkii meeris ee kastaa maxaa la isku yiraah?
   Waxaa la isku yiraah hal tuduc.
7. Waa maxay alan?
   Alanku waa xubnaha dhawaaqa yar-yar ee meeriska ka kooban yahay.
8. Maxay kala yihiin hoojis iyo hooris?
   Tuduca lugtiisa hore waxa la yiraah hoojis, lugtiisa dambena waxa la yiraah hooris.
9. Goormaa ayuu dhacaa dhambalan?
   Dhambalanka wuxu dhacaa haddii lugta hore ee hoojiska ku dhamaado shaqal dheer.
10. Waa maxay meeris-jab?
    Meerisjabku waa ereyga hadda loo yaqaan deelqaaf.
11. Qor tirada alannada ee tuducaan?
    dingaraaradii nagu dhacdiyo, webi dabaashiisa din /ga /raa /ra /dii = 7
    2 1 2 1 2
12. Waa maxay qaafiyad?

    Qaafiyadu waa tiirka dhismaha maansada Soomaaliyeed

13. Maansadu maxay kakoobantahay?

    Waxay ka kooban tahay meeris

14. Immisa shibane ayaa alanku raaci karo?

    Waxaa raaci karo hal ama labo shibane

15. Alanku muxuu kabilaawdaa?

    Wuxuu kabilaawdaa shaqal gaaban iyo shaqal dheer

<u>Keen maahmaahyadan dulucdooda</u>

1. **Allahayow sanad kii tagay haraan tidiisa nadhaafi kan soosocdana haraantidiisa**

   Micnaha waa dhibaatadiis hana haleeshiin labadaba

2. **Il buuxi aragtaa barkhad ma aragto**

   Micnaheeda waa qofka asoo wax badan arkayo wax yar maqaato / seakale qof galas buuxo oo cano **ah a** soo arkayo mid haf maqadanaya

3. **Il il ma dhowrta**

   Waxaa loo la jedaa qof qof ma ilaalin karo.

4. **Il way Ayaan badan tahay qoriga mudaayana ma aragto.**

   Waxaa loola jeeda qofka waxa kudhicidona ma oga ee uqoran dhib iyo dheefba.

5. **Ilko abeeso hoos bey kaxiriiraan.**

   Micnaheeda waa way iska war haayan.

6. **Ilko caanood cuno laguma calaalsho.**

   Micnaheedu waa caruurta yar yar cuno lama siiyo.

7. **Ilko wadajir bay wax ku gooyaan.**

   Micnaheedu waa wax wada qabsi ayaa hormar lagu gaaraa.

Dhacdo

Beribaa waxaa dhacday nin darawal ahaa ayaa baabuurkiisi rakaabka mid ka mid ah ayaa faniinay kadibna laamigii buu kudhacay taas waxaa keentay in ninku xanuunsanaa waxaa na taas muujinaysay in uu ahaa qof xanuunsan waxaa dadweynihi sanka u saareen maar wuuna soo nabdaaday.

Waxaa ukala saarnay magic, fal, meeleeye

Magaca	**Fal**	**Tilmaan**	**meeleye**
1. Saacad	Roorid	Aroortii	Kor
2. Cilmi	Diyargarow	Cawo	Hoos
3. Aw	Afnage	Caajis	Marka
4. Ayaan	Khiyaamo	Sabool	Kol
5. Ganjeelo	Riwayadeyn	Galbeed	Masaafur
6. Wadan	Beyni	Hanti	Nadir
7. Irid	Dirqi	Luuqad	
8. Hooyo		Awood	
9. Waalid		Tuugmo	

Kasoo saar tuducyadan inta hoojis iyo hooris ay leeyihiin

1. Jannaa udug leh , jiic baa gadgadoon leh , jahanamaa qiiq leh .

Keen maahmaahyadaan dulucdooda

1. **Laba bugto isma baaniso**

   Micnaheedu waa dad aan wax wada heysan wax is kuma qabankaraan

   Sidii shimbirka daa'uuska iyo gorgorka

2. **Labo ceerin waa ku qeybsaday is kuma cawrido**

   Micnaheedu waa dadkii wax yar qeybsado waxbadan is kuma diriraan

   Sida asxaabta okale. Dagaalkii tabuuk.

3. **Labo daran mid dooro**

   Micnaheedu waa labo dhib oo aan ku hureen mid qaado sidii xuseen dhiqle ku dhacday.

4. **Labo deeq ku heshiin weyday dood kuma heshiiyaan.**

   Micnaheedu waa dad cuno bilash ku heshiin wayey hadal kuma heshiin karaan.

   Sida sheekadii labada dawaco oo daanyeer uu kala garsoorayay ka dibna inta ay iskuhaaysteen asiga ka cunay.

5. **Laba garaad oo iska garab dhashaa waa la arkaa lkn laba bilood oo iska garab dhashaa lama arag.**
6. **Laba kala bariday kal war la.**

   Micnaha waa dad aan is ka war hayn war iyo wacaal oo aan is ku tala darsaneynin qofba looxiisau aloolsantahay.

7. **Labo qaawan isma qaado**

   Micnaha waa labo aan wax isku tareen isma heyn karto oo waxba kuma trinoln.

8. **Nin yar intuu geed kaboodaa ayuu talo ka boodaa**

   Micnehedu waa dhalinyarada xaajo looma dhiibo waayo fudeed aya wax uga dheelayo oo meeshiloogu baahnaa ayuu seejiyaa dadka oo aan mudneen buu garta siiyaa.

   Sida deegaanka oo xaafada loo dhiibo.

Keen erayadaan soo socda lidooda iyo erayo lamicna ah.

Erayga	**Lidkiisa**	**Eraylamacnoah**
1. Dhowrto	Qoonsi	Eegid
2. Afgambi	Afti	Xulis/coden
3. Kalakaan	Isku mid	Isku kad
4. Kabbo	Qurquri	Dhaqso u cab
5. Kabti	Duuni	Iimaanlawe
6. Xawli	Kaadis	Tartiib
7. Kalsooni	Xusli	Eexasho
8. Huuri	Haawi	Leerin
9. Lis	Gaaxi	Maalid

Keen erayadaan soo socda erayo lamicna ah

Erayga	**Erayo lamicno ah**
1. Caad	Daruur , xuub cad
2. Caal	Cudur, maqar
3. Caar	Midab, qaawid
4. Cabban	Sheegasho, taabasho
5. Cadar	Udug, waqti

6. Cad cad	Waxaro , bar
7. Calaacal	Daawo , beerlaxawi, sacab
8. Caddan	Lacag , daacad nimo
9. Cagaf	Cagta gela, makiinad

Casharka 4aad: mudnaan badan

1) Socdaal immisa sano ayuu Qur'aanka ku dhammeeyay?

Saddex sano ayuu Qur'aanka ku dhammeeyay.

2) Qoyska Socdaal maxay ahaayeen?

Beeraleey iyo xoolaleey.

3) Maxay ku han weynaayeen qoyska Socdaal?

In haddii dugsiga laga bixiyo uu la qaban doono howlaha adag ee cidda hor yaala.

4) Maxayse noqotay rajadii qoyska?

Waxay noqotay in Socdaal ay maradiisa garabka u saarnaato noqdayna dhoodaal dharaartii ciyaar iyo baratan u aada ceelasha, markuu daalana geed hoos seexda.

5) Aabbaha Socdaal iyo odayaasha deegaanka maxay maxay go'aan sadeen mar haddii Socdaal asaagii ka haray?
Calaf Allow cajab waxa la go'aansaday in wiilka reer loo dhiso laguna daro gabar caqli badan.

6) Tumey ahayd gabadha loo dooray maxayse ogayd?

Waxay ahayd Dhool waxayna tiqiin dhaqankiisa waarufnimo.

7) Waxtarka dumarka heesta ka hadlaysay maxa la yiraah?

Waxa la yiraah Saylo.

8) Maxay ahayd Khadiijo Bintu Khuweylad?

Hooyadii Mu' miniinta, haweeneydii ugu horeysay ee Nebiga rumeysay.

9) Dadka diidan in dumarka waxtar u leeyihiin bulshada maxay ku wiirsanayaan?
Waxay ku wiirsanayaan ma : Nabadda ay horseedka u yihiinbaa, qalbi jileeca badanbaa, barbaarinta wanaagsanbaa, degenaanshaha badanbaa, taxadarka badanbaa,haybada iyo quruxda Alle(SW) siiyaybaa , xanaanaynta ubadkoodabaa.

10) Sharax gaaban ka bixi"Rag wuxuu isku dhaafaa ciidan dumar iyo caano idaad"

Ninba ninka uu ka naag fiicanyahay waa ka waxtar badan yahay, caanaha idahana ka waxtar badan caanayowga kale.

11) <u>Sheeg howlaha guriga laga qabto?</u>

Waxaa kamid ah:

B: cuno Karint: dhar dhaqidj: nadaafad

X: adeeg suuq kh: ilaalinta ubadka iwl.

12) Wiilka deeganka ku noolaa maxaa laoran jiray?

Waxaa la odhan jiray socdal

13) Qoyska socdaal maxay hanti lahaayeen?

Waxaay lahaayen beer iyo xoolo

14) Socdaal yaakasoo dacwooday?

Waxaa kasoo dacwooday odayaasha deegaanka

15) Socdaal muxuu ahaa?

Wuxuu ahaa wiil cayaar jecel

16) Yaa soo jeediyey arinta guurka socdaal in gabar lagu daro?

Waxaa soo jeediyey oday Guure.

17) Qiimo intee bey haweenka ku leedahay bulshada?

Waa macalinka ugu horeyey ee dadka

18) Hooyo maxay bulshada ka soo sartaa?

Waxaay ka soo saartaa sheeq, aqoonyahan, macalin, wasiir, madaxweyne, ciyaaryahan, abwaan, general, safiir, ganacsade.

19) Yaa tiriyey guurowga qiimaha hooyada?

Waxaa tiriyey abwaan Careys Ciise Kaarshe

20) Maxay tahay dulucda sheekada?

Dulucda sheekadu waa in hooyadu tahey barbaariyaha bulshada .

21) Maxaad ka faa’iday sheekada?

Waxan ka faa’idnay in hooyadu tahay horseedka hormarka iyo badbaadada ubadka

22) Dumarku door maku leeyihiin bulshada?

Haa wey kuleeyihiin dhanka nabada, barbarinta, degenaanta, taxadirka,xanaaneynta, qalbi nuglanta.

23) Immisa qof ayaa ka muuqda sheekada?

Waxaa kamuuqdaa

B: Socdaal, Dhool, oday guure, dhalinyarada deegaanka, odayaasha deegaanka, Carees Ciise Kaarshe, hawenka.

Sharax ereyadan

Cirinciir: meel fog ku libirsan

Cobol: rucubta sare ee baarka geedka duurka

Ciyi: hilibka reerka wax qashay siiyo reero kale.

<u>Keen maahmaahyadaan dulucdooda.</u>

Rag waxa uu isku dhaafay ciidan dumar iyo caano idaad.

Micnaha waa ciidan waa waxqabadka dhan waliba ugeey dumar si hagar la'aan uqabtaan.

Caanaha idaha waa kuwo waxtar uleh.

Nin wiil fiican lihi maciidanyara.

Micnaha wiilka waa garab lixaad leh dhanka qoyska markii lajoogo miiga waayo dhanka soofinta xoolaha, tacabka beeraha.

Nin rati fiican lehna ma geel yara.

Micnaheedu waa ratiga oo ah gaadiidka dhulka misana waa xoolaha soomalida kan ugu waxtarka fiican.

Nin kaa naag fiican udhaxdana manafci yara?

Micnaha waa dumarka waxyaabo badan bay kahaasaa reer ka dhanka ubadka, kawar qabka hanti iyo xanaaneynaya ragooda.

Xidid wada yaal waa xil wada yal.

Micnaheeda waa reerka aad gabadha kaqabto oo aad meel wada tagtaan oo meesha aad kaseexato kaalintaada aya looga yaaba masuuliyad xumo inaad kulanto waa in aad dhexda xirataa adigoo ilaalinayo xidid nimada qoyska.

Xidid xeradiisa waa iska furantahay

Micnaheedu waa laba qoys nin iyo naagtiis is qaba wax ukalama soocna waayo waa isku deegaan.

<u>Isu beeg sharaxaadda iyo erayada</u>

1. Waa codka gaduudan ama madow ee ilkaha ku fadhiyaan (**cirid).**
2. Meelfog ku libiqsan meel ishu gaareyn(**circa**).

3. Talo xun aya lasiiyey dhibaataa haysata(**cirin ciir**).
4. Waa dabeesha dhulka isku maleegta ee cirka is ku liqdarta kolka roobka curanayaan ee ay kaliilaha tahay (**cirrimis).**
5. Hilibka reerka wax qashay siiyo reeraha kale(**ciyi**).
6. Curubta sare baarka geed ka duurka (**gobol**)
7. Waa qanjirada kuyaal xagga sare ee meesha labada hun guri ku kul maan ee dhabaaqa iyo jabaqda abuura(**cod curiye**).
8. Arinta wuu ku dag degay waxa kale ayuu isu qaatey (**cirkaa loo ga dhawaaqay**).
9. Waa kolka laagta ama dhudhubta yeelato meelo laab laabato ah oo yare leexsan (**congol).**
10. Waa xidid margi ah oo hunguriga labada dhinac ka mara (**coobbe**).

Erayga iyo lidkiisa iyo eray lamicno ah.

Erayga	**Lid kiisa**	**Eraylamacnoah**
Gibil	Agas	Midibka kore
Gun	Baar	Fiida sare
Dulu laati	Ciq	Xog
Daryeel	Baylaha	Dayacan
Juuq	Jaaq	Aami sid
Caad	Gogol	Dhul
Murti	Sir	Qaris walax
Axan	Maleeg	Soohid
Agabar	Layli	Labobarid
Shalay	Manta	Aminta(maantay)

<u>Casharka 5add: ruwaayadii shabeela naagood</u>

1. **Ya alifay riwayada shabeel naagod**

   Waxaa alifay xasan sheekh muumin

2. **Yaa jilay riwaa yadii shabeel nagod**

   Waxaa jilay riwaayada

   B: Cabdulle Raage Taraawil (shabeel)

   T: Hibo Maxamed Hudoon(diidan)

   J: Caasho Cabdow Sulaymaan (dhaqtarada)

   X: Cabdi Muxumed Amiin(dalmar)

   Kh: Maryan Mursal Ciise (shalaayo guleed)

   D: Xasan Sheikh Muumin

   R: Xasan Diiriye Faarax (ninka wadaniga)

S: C\laahi Farey (guuled)

Sh: Maclow Nuur (qaaliga)

Dh: Shamado Liibaan (hooyo)

3. **Xasan Sheikh Mumin halkuu ku dhashay?**

   Wuxuu ku dhashay Magaalada Saylac

4. **Sanadkuu dhashay Xasan Sheekh Mumin**

   Wuxuu dhashay sanadkii 1931kiii

5. **Halkuu ku geeriyooday Xasan Sheekh Muumin?**

   Wuxuu ku geeriyooday dalka Norway 16_jan _2008

6. **Ruwaayada shabeel nagood waamaxay ujeedadeeda?**

   Waa raga damacoodu badan yahay iyo dumar lacag jeceelkooda in dadka ay ku baraarugsanaadaan iska ilaaliyaaan shirqoolada raga ay udhigayaan gabdhaha.

7. **Sheeg saddex sirood oo ay adagtahay in laga salgaaro?**

   Saddexda sir waa:

   Sir dhul, sir naag iyo sir wadaad

8. **Hadaba sheeg sirtaada waxa kaa fashilin kara?**

   Waxaa kaa fashilinkara xilliga iyo fudeedka

9. **Gabadha shalaayo hooyadeed maxaa la oranjiray?**

   Waxaa la oran jiray shamado

10. **Maxay tahay hididiilida uu diidane galiyey shalaayo?**

    Iney ka tanaasusho is dilida naf hurida ah

11. **Maxay dareentay shalaayo markii ay utimid qaadiga?**

    Waxay dareentay kalsooni weyn iyo niyada oo udagtay

12. **Muxuu askarigii qaadiga dareensiiyey?**

    Wuxuu dareensiiyey in ninkaan aragti gaar loo yeesho oo ay dacwadiisu in badan soogaartay

13. **Sidee lagu sixi karaa arimaha noocaan oo kale?**

    Waxaa lagu sixi karaa kow in dumarka wacyi galin badan lasiiyo

Erayga lidkiisa iyo Eray Lamicna ah

Ereyga	**Lidkiisa**	**Eray lamacno**
1:dhamac	Dambaaburo	Dhimbil
2:madag	Tarag	Afku dable
3:shid	Xeexi	Dajin ,baqtin
4:daar	Dami	Xasilin
5:olol	Gammar	Nasiib
6:jarmaado	Caraabo	Hoyasho
7:xagaa	Diraac	Abaar
8:hal nowle	Haniye	Xidid wayn
9:min yaro	Min weyn	Bah weyne
10:kisi	Dhaban	Labo

Erayga jidkiisa iyo Eray lamicna ah

Ereyga	Lidkiisa	Erey lamacno ah
1:marwaaxad	Babis	qaboojiye,dhaqdhaqaajin
2:baraketsi	Barqadays	Weyneen,ixtitam
3:nimco	Barwaqo	Aaran
4:duco	Baryo	Allabari
5:dayac	Baylah	Ilaalin la'aan
6:jaho	Beyin	Dhabo tusid

Casharka 6aad: Garwaaqsiin

1. Waa maxay garwaaqsiin?

   Garwaaqsiintu waa qaab qoraal lagu qanciyo qofka si waxa aad dooneyso looga gungaaro.

2. Waa maxay qormada garwaaqsiintu?

   Waa xirfad qoraal oo aad ku soo bandhigeyso awoodaada qoraalka, aftahannimadaada iyo adeegsiga afkaaga hooyo.

3. Doodda garwaaqsiintu maxaa la yiraah?

   Waa tababar iyo layli aad noloshaada ku hormarineyso.

4. Waa maxay dood wadaag?

   Waa isku-dheeli tirka itaalka iyo liidashada labada dhinac ee doodaya.

5. Talaabooyinka la raaco marka la qorayo garwaaqsiin waa immisa?

   Waa sagaal qodob. Waa in aad shaandhaysaa oo huftaa waxa aad doonaysid in cid kale kaaga garwaaqsato.

6. Maxaad u baahantahay marka aad rabto in aad qorto garwaaqsiin ?
   Waxaan u baahanahey in aan qiimeeyo meesha aan xogta kasoo qaadanayo .
7. Qiimee meesha aad xogta ka soo qaadanayso.

   Dib u qoridda weerahii garwaaqsiinta ka curatay iyada oo loo dhigayo si ka duwan sidii markii hore loo qoray. Habkaasi maxaa la yiraah?

   Waa gunaanad.

8. Qor saddexda nooc ee ay ka kooban tahay qormada garwaaqsiinta?

   Waa arar, duluc iyo gunaanad.

9. Maxay ka kooban tahay dulucdu?

   Waxay ka kooban tahay hal ilaa afar tuduc ama ka badan oo aad ku tifaftirayso doodaada?

10. Waa maxay dhalanka dhulka?

    Waa goobta ugu wacan ee kasbashada aqoonta ee wax lagu baran karo.

11. Maxaa la yiraah walax baarka waxbarashada?

    Waxa la yiraah dhalanka dhulka.

12. Marka uu ardaygu booqdo dhalanka dhulka muxuu helayaa?

    Wuxuu helayaa waxyaabihii la bari jiray in uu si cad u arko sida: noocyada dhagxaanta, ciidda, cayayaanka iyo noolayaasha kale.

13. Muxuu yahay booqashada dhalanka dhulka iyo walax baarka Sayniska?
    Waa sooyaal dhaqan oo nolosha harumarkeeda ka qayb qaata.
14. Waxaad qortaa qormo garwaaqsiin ah oo aad u qorayso wasiirka waxbarashada adigoo ku garwaaqsiinaya in ardaydu dugsiyada sare ee waxbarashada ku wanaagsan loo diyaariyo aqoon dersi dibada ah.
15. Sharax erayadan
    Taano
    Kumi
    Takoor
    Eel
    Dus
16. Isku hagaaji ereyadan si ay u noqdaan weero macno leh.
    La qabay indho buuxshaan ----- la buuxshaan indho ilin qubay.
    Il adeeg arooskeeda ay ka boodaa --- arooskeeday il ka adeeg boodaa

17. Sheeg habab ka qofka wax looga dhaadhicin karo?

    Waxaa kamidah:

    B: In aad dhageesato hadalkiisa

    T:in aad dhiirigaliso qofka

    J:in aad hubiso dhaliilaha jiro

Sharaxaad iyo Eray

1. Hadal u diidis ama af xiris ama af ku toob (afjig)
2. Laga hadal badiyey ama laga cod karsanyahay ama laga dood badiyey (afjuxuun)
3. Yaab iyo amakaag ama wax lala argagaxo (afkala haayn)
4. Af kala hayn ama isla yaab ama cajiib (afkalaqaad)
5. Qof ka dadka afka kahabaara ee la hela (afkuleeb)
6. Wax af wareegsan leh sida weelka(afmeer)
7. Magic looyaqaan neefka dhiciska ah eegeela (aflagaado)
8. Adyad ama cay ama maagis (afkuxaare)
9. Qofka war abuuraha ee afkiisa ku shaqeeeeysta (afmiishaar)

Erayga, lidkiisa iyo lamicna ah

Ereyga	**Lidkiisa**	**Eray lamicno ah**
1:dariishad	Irrid	Ilin
2:lug	Gacan	Xariiqtoosan
3:sal	Baar	Fiida sare
4:wadajir	Kalatag	Is maandhaf
5:dhab	Dheeel	Ciyar,kaftan
6:dil	Daa	Dhaaf
7:jaceel	Neceb	Xasid
8:wadeey	Cadow	Hagar daamo
9:olad	Dugaag	Duunyo
10:doog	Abaar	diraac

Keen ereygan ereyo lamicno ah

Ereyga	**Erey lamicno ah**
1:aglool	Jaangoon,qoondeen
2:aqool	Qaybin,xiliyada,cunada la cuno
3:arar	Gogol dhac,hor dhac
5:asal	Unkamid,bilaabid
6:asiili	Farbarid,barbaarinta carruurta
7:asqo	Haraad,biyo waayid
8:awlal	Isku jir,dhafan
9:ay	Layaab,arin kadis ah
10:arxa	Gargaar,cawin

Casharka 7-aad: Gayiga Soomaaliya

1. Dhulweynaha Soomaalidu degen tahay xagguu ku yaal?
   Waxa uu ku yaal waqooyi-bari ee qaaradda Afrika waana geyi baaxad ballaaran.
2. Geyigeenu xaggee u jeedaa?
   Gayigeenu waa geeska fiiqan ee u jeeda dhanka gacan badeedka carabta
3. Sheeg waxyaabaha uu leeyahay dhulka Soomaalida?
   Geyiga Soomaaliya waa dhul leh barwaaqo badeed, xoolo nool, dhul beerasho ku fiican iyo barwaaqo dhulka ku duugan.
4. Immisa ayaa madax bannaan shantii qaybood ee u kala qaybiyey gumeystayaashii dhul waynaha Soomaalida.
   Waxaa madax bannaan saddex: waqooyi, konfur iyo jabuuti.
   Labada aan wali xoroobin waa: (NFD) Kenya iyo Soomaali Galbeed (Itoobiya).
5. Maxaa la yiraah meesha ay ku kulmaan labada badood Badweynta Hindiya iyo Badda cas.
   Waxaa la yiraah Raas Caseyr
6. Raas Caseyr maxay leedahay? Maxayse caan ku tahay?
   Waxay leedahay lag la yiraah Lafo gure waxayna can ku tahay laagta dhankeeda konfureed qofka jooga wuu dhaxamooda qofka dhanka waqooyi ka joogose kuleyl ayuu la cadilmaya.
7. Soomaaliya marka laga reebo dhulka buuraleyda ah, qiyaas intee la eg ayaa ah dhulka beerashada ku wanaagsan?
   Waa 80%
8. Keebaa weyn wabiyada Soomaaliya mara ee Jubba iyo Shabeelle?
   Webiga Jubba ayaa ka weyn Shabeelle.
9. Webiga Jubba xaggee buu Badweynta Hindiya kaga daraa?
   Tuulada Goobweyn ee agagaarka Magaalada Kismayo.
10. Sheeg sababta webiga Shabeelle ugu dheef badan yahay Jubba?
    Waayo jiinka webiga Jubba wuxuu u badan yahay cusbooleey ah.
11. Magaceed buurta ugu dheer Soomaaliya? Waa intee dhererkeeda?
    Suurad 8,000 cagood.
12. Qor inta aad ka taqaanid magacyada buuraha dalka Soomaaliya?
    Buuraha teelteelka ah waa: Buur Hakaba, Buur Heybe, Buur Fulaay.
    Buuraha silsilada ah waa: Buuraha Daalo, Shimbiris, Sheekh, Shar laga naadi, gacan libaax, karkaaro, naaso hablood iwm.
13. Waa noocee deegaanka aad hadda ku nooshahay?
    Deegaankeygu waa dhulka loo yaqaan xeeb waayo waxay leedahay dhul xeebeed ku teedsan oo leh carro bacaad ayna kazoo bixin tigaad wax tar leh.
14. Dooxooyinka dalka ugu caansan maxaa la yiraah?
    Waa dooxada Nugaal oo ku teedsan ilaa shan gobol iyo dooxada daroor oo ah gobolka Bari.
15. Dhulka adablaha ah xaggee buu caan ku yahay? Maxuuse leeyahay?
    G/Baay, wuxuuna leeyahay warooyin yar-yar oo leh biyo qabad wanaagsan oo ay xoolaha iyo dadkuba ka cabaan.

16. Imisa qof ayaa wada safray?

    Waxaawada safray 3 nin

17. Sadexda wada safray maxay kala ahaayeen?

    Waxay kala ahaayeen b)fuleey t)geesi j)abwaan

18. Waa maxay saqaafid?

    Saqaafid waa socdaal ama safar

19. Saddexdii nin e socotada ahaa yaa ku soo baxay?

    Waxaa ku soo baxay saddex libaax meel cidla ah

20. Libaaxyadu maxay kala ahaayeen?

    Waxay kala ahaayeen b) aar t) Baranbarqo j) Gaani

21. Libaaxyadu maxay ku tashteen?

    Waxay ku tashteen in saddexda nin aysan ka fakan

22. Saddexda nin ayagana maxay ku tashteen?

    Waxay ku tashteen in ay dilaan libaaxyada

23. Goormuu tiriyay maansadaan gayiga Soomaliya?

    Wuxuu tiriyay 1972 kii

24. Sheeg ujeedada uu utiriyay abwaanka maansadaan?

    Wuxuu tiriyay in la barto dalkaaga hooyo inta aadan baran wadamada shisheeye

25. Waa immisa km xeebta dalkeena?

    Waa 3333 km

26. Halkee kaga egtahay xeebta dhanka woqooyi?

    Waxay kaga egtahay babul mandab ee badda cas

27. Halkee kaga egtahay koonfur galbeed?

    Waxay kaga egtahay raas kambooni ee jubbada hoose

28. Sheeg meesha ay caalamka ugu magac dareen geeska Afrika?

    Waa Raas Caseer

29. Sheeg meesha ay kaga taal dalka Raas Caseer?

    Waxay kaga taaal meesha ay iskaga darmaan badweyta hindiya iyo badda cas

30. Maxaa kuyaala meesha ay iskaga darmaan labaada badood?

    Waxaa ku yaala lag la yiraahdo laf gure

31. Haddii aad laagta lafo gure ka istaagto dhanka woqooyi maxad dareemeysa?

    Waxaad dareemeysaa kul

32. Haddii aad laagta lafo gure ka istaagto dhanka koonfureed maxaad dareemeysaa?

    Waxaad dareemeysa dhaxan

33. Berriga Soomaaliya muxuu leeyahay?

    Wuxuu leeyahay dhul wanaagsan oo kala jaad ah

34. Sheeg jaadadka uu leeyahay gayigeena?

    Wuxuu leeyahay b) dooxo t)bannaano j)hawd x)buuro kh)cadduun d)deex r)adable s)madhayd

35. Waa maxay xeeb?

    Xeeb waa dhul ku teedsan badda oo carro dhanaan ah oo aan dhirta waxtar ulaheyn

36. Waa maxay deex?

    Deex waa dhul caro cad oo ku teedsan badda oo kulley, dhanaan meel dhaxdhaxaad leh

37. Sheeg magaalooyinka ay ku teedsan tahay xeebta?

    Waxaa kamid ah b) Kismayo t) Baraaawe j) Muqdisho x) Warsheekh kh) Hobyo d) Boosaaso r) Berbero

38. Sheeg inta uu u qaybsamo gayiga Soomaaliya deegaan ahaan?

    Wuxuu u qaybsamaa 12 qaybood b) Dhoobeey t)guban j)oogo x)dooy kh)ciid

39. Sheeg dhulka deexda waa side?

    Waa dhul aan xoola ku badneen

40. Waa maxay ooge?

    Waa dhul buura sare leh kuna rogmada howdka

41. Waa maxay doox?

    Doox waa dhul udhaxeeya hawdka iyo buuraha

42. Waa maxay hawd?

    Waa dhul caro guduudan ayna ku badan yihiin dhagaxaan yar yar

43. Waa maxay dooy?

    Dooy waa dhul u eg muqaal ahan hawdka

44. Waa maxay dhoobeey?

    Waa dhul madoow oo ku yaala wabiga jiinkiisa.

45. Waa maxay caduun?

    Caduun waa dhul caro guduudan leh

46. Waa maxay adable?

    Waa dhul isugu jira midibada dhulka kana baxaan geedo dhadeer.

47. Waa maxay madhayd?

    Waa dhul hawdoo kaliya leh.

48. Sheeg waxyaabaha dhibaatooyinka ku ah gayigeena Soomaliya?

    Waxaa kamid ah:

    b)Dhirta oo la cirib tiro

    t)In xoolaha la xaalufiyo

    j)In la wasaqeeyo hawada iyo deegaanka iyo baddaha

Isubeeg sharaxaada iyo erayada soo socda

Tiro	**Sharaxaad**		**erayga**
1.	Meel jadiin ah oo biyuhu xoog umaran xiliga barwaaqada	**7**	bogasho
2.	Dhismo xoog leh oo lagu helo joojiyo biyaha qulqulya	**6**	bogaadin
3.	Qolof aleelo ah oo lagu helo meelaha badda ka caarida	**9**	Boholyow
4.	Subaga ku baxa caanaha geela ama miro qaraha u eg	**8**	Bohol
5.	Cad tahar ah oo beerka hoostiisa ku yeel oo neefsada iyo dheefshiidka taage	**10**	Bohon
6.	Qof waxaa loo bog sameeyay ama halmbalyo	**2**	Biyo xir
7.	Hawl la sugay ama aamin ku filan la siiey am aka baarandeg	**1**	Biyo mareen
8.	Godad jeex jeexan oo biyo mareen ah booraan	**4**	Bocor
9.	Waxaad jeceshahay oo aad tabaysa , hilow	**3**	Bocool
10.	Labood noole ee aan wax rimin Karin	**5**	Bog

Ku qor magacyada geedo ka baxa gayiga soomaliya

Tiro	Magacyada geedaha
1.	Mareer
2.	Qurac
3.	Qansax
4.	Dacaar
5.	Hareeri
6.	Diinsi
7.	Dharkeyn
8.	Dano
9.	Carmo
10.	Murug

Ku qor erayadaan soo socda micno kale

Tiro	Eray micno badan	Micno kale
1.	Doog	Cagaar, tigaad
2.	Jibaax	Qurac , jiq
3.	Mool	Qod,biyaha meesha ay fariistaan
4.	Qalo	Baad,gawricid
5.	Aayo	Habar yar , mustaqbal
6.	Dub	Sayn, maqaar
7.	Qab	Sharaf, xero
8.	Oog	Iftiin, dab
9.	Olol	Holac, cabaad
10.	Hohob	Kabo, geed

Casharka 8-aad: Dood dheelitiran

1. Marka ninku haasaawe maago, Soomalida hore dhaqankeeda maxaa looga baahan yahay in uu ahaado?
   Waa in uu yahay aftahan xirgada hadalka yaqaan, sheeko bandanna.
2. Ninkii marku uu saxay salaantii maxay gabadhii ku xujeysay?
   Waxay ku xujeysay in uu isku kol ku fariisto saddexda goglood ee labada il-xir iyo tan irrida.
3. Maxay ku saabsan tahay dood dheelitiran?
   Dood dheelitiran waxay ku saabsan tahay bandhigga aragtiyaha kala duwan ee dadka maankoodu kala duwan yahay.
4. Waa maxay sirta ereyga iyo afka?
   Sirta ereyga iyo afku waa furaha carro-edeg.
5. Afkaaga oo horumarsan muxuu keenaa?
   Wuxuu keenaa in horumar laga sameeyo dhanka diinta, farsamooyinka cusub, wax barashada, beeraha, xoolaha, dhaqaalaha, arimaha bulshada iwm.

6. Waa maxay Af- Soomaali?
   Af-Soomaaligu waa af ballaaran, ereyadiisuna badanyihiin dhan loo eegaba tix iyo tiraab, hadal iyo howraar, maanse iyo maahmaah, gabay iyo geeraar, masafo iyo madadaalo, hees iyo heello, sheeko iyo shaxariira qorriin iyo qun u hadal.
7. Muxuu qofka u taraa afka Soomaaliga?
   Wuxuu u taraa waa kan lagu adeegta maalin kasta oo aad doodaada iyo dantaada ku caddeysato.
8. Maxaa u fududaada qofka afkiisa si fiican u barta?
   Qofka si fiican afkiisa u yaqaan waxaa u fududaada in uu si sahlan u fahmo afaf kale.
9. Qor murti xuseysa muhiimadda afkaaga?
   Afka waxa uu la xoog yahay, maqliga xawda kaa jara'e
   Geed kaa dheer dhaxan kaama celiyo
   Afkaaga oo aadan ku cadgoosan waa cadow kugu yaal
10. Sheeg afaf kale oo bahwadaag la ah afka Soomaaliga?
    Afafka aynu bahwadaagta nahay waa: Oromo, Siidamaha, Dankeliga, Saaxada, waa afafka kuushiyiinta.
11. Waa maxay dood?

    Doodu waa wada hadal dhaxmara laba qof iyo in kabadan

12. Doodu maxay ku bareysaa?

    Doodu waxay ku bareysaa inaad ka fogaato buuqa, carada, caayda, aflagaadada,iwm.

13. Doodu qofka maxay utababareysaa?

    Waxaay utababareysaa in uu awood uyeesho xakameenta hadalka marka u ka qeyb qaadanaayo doodaha.

14. Doodu maxaay muhim utahay?

    Waxaay muhiim utahay haab walba oo qofku ku dhiiri gelisaa inuu wax ka hadlo.

    - Waxaay qofka bartaa wax soo jeedinta ay lee dahay.
    - Xirfada wada hadalka.
    - Wuxuuna noqdaa qof cod kar ah.
    - Waxaay kor uqaadaa uruurinta erayada.
    - Waxay kor uqaadaa qota dheerida aragtida kana digtaa dhageste fiican.
    - Sidookale waxaay qofka galisaa kalsooni xaga hadalka.
    - Waxaay ka dhigtaa inuu noqdo qof hadalkiisa miisaman yahay
15. Doodu ula jeedomaleedahay? Waayo?
    - Haa, waa in aay doodu lee dahay.
    - Waa in ciwaan leedahay.
    - Waa in ay gudoon leedahay

- Waa in ay qoraayaal leedahay.
- Waa in aay aqoon kororsi leedahay.

16. Ma jirtaa wax yaabo dood wadaaga ka reeban? Wax ka sheeg?

    Haa , waxaa ka mid ah:

    - In aan adeegsiga telefona dooda dhexdeeda.
    - In aan laga bixin ciwaanka dooda.
    - In aan ku xad gudbin gobta doodu ka socoto.
    - In la ilaaliyo xiliga dooda socoto iyo inta ay ka dhamaaneeyso.
    - In uusan qofka ka soo kicin booska loogu tala galay.
    - In uusan fadhi ku hadlin waa hadii uusan xubin la'een.

17. Sheeg xeerka dooda?

    Xeeerka dooda waxaa ka mid ah:

    - Inuu istaago qofka hadlaayo.
    - Inuu ku sugnaado goobta looga talagalay.
    - In la maqlo codkiisa marku hadlaayo.
    - In uu sugo xiligiisa uusan daafin hadalka.
    - In uu tixgilin siiyo qofka kale.
    - In uu soo bandhigo caddeeymaha asagoo ku saleynayo fikirkiisa diidmado iyo ogalaashaha.
    - Illaalinta waqtiga dooda**.**

18. Maxaa lagu yaqaanaa dadka Soomaalida?

Waxaa lagu yaqaan b) aftahan t) hadal yaqaan j) sheeko badan.

19. Waa maxay shabeel naagood?

Waa naaga shabiye ama nin shukansi badan.

20. Guriga uu ninka yimid maxa yaalay?

Waxaa yaalay saddex darmood.

21. Gabadha loo yimid maxay ninka ku tiri?

Waxay ku tiri waa in aad saddexdaan darmood waa inaad hal goor waa inaad ku fariisataa.

22. Maxay gabadha ninka sidas uga xujeeysay?

Waxay ugu xujeeysay inaay ogaato garaadkiisa iyo ula jeedkiisa.

23. Afka shisheeya ma noqon karaa mid badala afkeena?

Maya, waayo afkeenu waa mid hodan ah, waana kaydiyaha dhaqanka, aqoonta,sirta bulshada iyo murtida.

Isubeeg sharaxaada iyo erayada soo socda

Tiro	Sharaxaad		erayga
1.	Yuurar, meel iska fadhiya	**7**	daado
2.	Warka, xogta iyo wacaal inta isku xiran ee isku ujeedo ah	**5**	daabaqad
3.	Dad , doox hurin, dad badan oo meel wada jooga ama cimir ah	**8**	daad
4.	Xaarka xoolaha yar yar dhigaan kolka ay caano ka dhergaan waa mwsha la qabto agabka weelaha qorriga gudinta la geliyo si ay wax ugoyso .	**9**	daadah
5.	Summadda lagu sameeyo kolka xoolaha seyladda la keeno	**3**	cutub
6.	Rar isdaba jog ah oo wax rarayo	**1**	cuskug
7.	Kolka cuntadu isku quruunto caloosha ee dheefshiidka gaabiyo	**6**	daabul
8.	Biyaha rogmanayo roob da,ay ka dib	**2**	cuur
9.	Eray loo adeegsado kolka carruurta socdaalka la barayo	**4**	daab

Isu doon maahmaayadaan qeybta 1aad iyo qeybta 2aad

Tiro	Jooga kowaad		Jooga labaad
1.	Indho gardaran hadday ooyaan	**3**	Waa wada indho
2.	Dhaayo aan meel dheer wax ka arag	**8**	Biri maqabowdo
3.	Kor waayeel waa	**5**	Ninba labo nin la,egyahay
4.	Indho laanta dhabta ahi	**7**	Maalku ha lumo
5.	Inta buufimo taal	**6**	Baa la dhawrsadaa
6.	Inta dhogortaadu fayowdahaay	**1**	Kuwo garlihina ka sii daran
7.	Inta magacu lumi laha	**4**	Waa tan qofka labo jeer good ku riddo
8.	Inta nabaddu joogtay	**2**	Inay dhacaan baa uroon

Keen erayadaan soo socda lidkooda iyo erayo la micno ah

Tiro	Erayga	Lidkiisa	Eray la micno ah
1.	Kaabi	Kaftan	Ciyaar
2.	Galbeed	Bakool	Qorax dhac
3.	Ilaaq	Qoonsi	Yasid
4.	Kahasho	Jamasho	Jeclaasho
5.	Kaliil	Gamashi	Naq
6.	Caraabo	Kallah	dheelmasho
7.	Kalsooni	Tahan	xoog
8.	Kama	Kas	Bareer
9.	Kaah	Mugdi	gudcur
10	Dhay	Garoor	suusar

Ku qor erayadaan soo socda micno kale

Tiro	Eray micno badan	Micno kale
1.	neef	Maan yari , xoolaha la dhaqdo
2.	Tuug	Xatiiyo, baryo
3.	Toogo	Kol, muraad
4.	Toob	Cambuur , jiidid
5.	Shaash	Masar, midib

6.	Soor	Bunduq, hanti , cunto
7.	Soolane	Isbaabule, shaaha , waarikoowga
8.	Sibir	Qaraar, kabiska
9.	Lammo	Mataano, isku tolan
10.	Jus	Yar, gay

Casharka9-aad: Ruwaayadii Shabeel naagood

1. **Yuu u yimidninkii muranka badnaa?**
   Wuxuu uyimid oday aqoonyahan ah.
2. **Ninki muranka badnaa muxuu odayga weydiiyay?**
   Wuxuu weydiiyay ibliis iyo shaydaan dab aya laga abuuray ee maxaa naarta loo galiyaa.
3. **Odaygii muxuu ugu jawaabay su'aasha ninka?**
   Wuxuu ugu werceliyay wuu xanaaqay ciidanka wadooyinka ayuu ugu soo yeeray.
4. **Waa maxay gunnimo?**
   Gunnimo waa lahaystee.
5. **Yaa jillayay ruwaayada qeybtaan?**
   Waxaa jillayay b) diidan t) diidane j)gaban x) Guuleed kh) shammado d) Kulmiyer) Shabeel s) Shalaayo
6. **Faalo ka bixi fahamka jillaayaasha?**
   Waxaan dhihi karnaa in raga lagu fahmay shirqooladooda melena la iskag xiray.
7. **Hadaad jooji laheed maqaamka shammado iyo Guuleed maxaad sameen laheed?**
   Waan is fahmi laheen wareeg dheer ma aanan gali laheen.

Isubeeg sharaxaada iyo erayada soo socda

Tiro	**Sharaxaad**		**erayga**
1.	Agab biraha kale lagu ogaado	3	Bir qalax
2.	Birta jiirka lagu dabo	9	Bishil
3.	Birta biraha kale soo jiidata	7	Bir xarbi
4.	Bir labo qalbac ah oo dhuxusha lagu qabto	10	Cabaarfur
5.	Wadar biro badan oo qubane ah	4	Bir jeb
6.	Birta aan biraha kale soo jiidan	8	Warsan
7.	Bir dhuuban oo budunkha lagaga sifeeyo	1	Bir lab
8.	Wax wanagsan sheegis	6	Bir xaar
9.	Qori yar oo wax lagu adkeeyo , sida kolka gudintu daabka ka dhilato.	2	Bir jiir
10	Safarka meel ku socda meesha dhexe ee u ku nasto3	5	birqaad

Keen erayadaan soo socda lidkooda iyo erayo la micno ah

Tiro	Erayga	Lidkiisa	Eray la micno ah
1.	Galab	Aroor	
2.	Kamiin	Wabax	
3.	Kax	Jiq	
4.	Tashiil	Qoor	
5.	Korriin	Hagaas	
6.	Koror	Gaasir	
7.	Kub	Dhudhun	
8.	koran	Baatul	
9.	Dhagar	Daacad	
10.	Qurjad	qurux	

Ku qor erayadaan soo socda micno kale

tiro	**Erayo micno badan**	**Micno kale**
1.	Mir	Soocid , kali kali
2.	Maal	Hanti, lis
3.	Sariig	Xishood , dhawri
4.	Qalaad	Shisheeye, orgiga qooqan
5.	Hir	Codad, mawjad badda
6.	Doog	Cagaar,daab
7.	Daw	Wado, buuro
8.	Jab	Burbur, guul daro
9.	Jago	xil, banana
10	Lar	Laqanyo, xasus xun

Keen erayadaan soo socda lidkooda iyo erayo la micno ah

Tiro	**Erayga**	**Eray la micno ah**	**lidkiisa**
1.	Basaas	Jaynaf	Xog hayn
2.	Dariiq	Jid	Qardajeex
3.	Raace	Jire	Jooge
4.	Raacis	Kor	Reebid
5.	Nuur	Kaah	Mugdi
6.	Fahan	Kas	Garn waa
7.	Fahmo	Kasmo	Garasho laan
8.	Mar	Kol	Noqo
9.	Daqiiqad	Jiris	Maalin
1(	Tarmuus	Kululeyso	qabow

Casharka 10-aad: waayihii iyo taariikhdii (xaaji aadan axmed (Af qalooc)

Waayahii iyo tagtadii Xaaji Aadan Axmed Xasan

1. Xaggee buu ku dhashay Xaaji Aadan (Af-qalooc)?
   Wuxuu ku dhashay miyiga magaalada Ceeri-gaabo loona yaqaan Haldhagan ee toga Mirashi.
2. Abwaanka qiyaastii goorma ayu dhashay? Qarni intee la'eg ayuu noolaa?
   Abwaanka qiyaas ahaan wuxu dhashay sanadkii 1871kii wuxu noolaa in ku dhow qarni iyo rubuc.
3. Tuulada Haldhagan intee bey ceerigaabo u jirtaa?
   Haldhagan magaalada Ceerigaabo ayay dhanka waqooyi-bari ka xigtaa ilaa 50km.
4. Gormaa ayuu geeriyooday Xaaji Aadan? Xaggeena ku geeriyooday?
   Wuxuu geeriyooday 5tii Luulyo 1986kii. Magaalada Ceerigaabo.
5. Maxaa ku dhacay Xaajiga afar jirkiisi?
   Xaaji Aadan afar jirkiisii isaga oo ari la joogo baa libaax qaatay, labo maalmood ka dib ayaa la helay isaga oo meel cidla ah yaal. Markaas ayuu afka qalloocday.
6. Immisa caruur ah ayuu ka tegay abwaanka?
   Labo haween oo ajnabi ah waxay u dhaleen 5 caruur ah oo heybtooda meel lagu sheegin, markuu soo laabtayna wuxuu guursaday ilaa saddex haween ah, waxay dhaleen afar caruur ah.
7. Immisa luuqadood ayuu ku hadli jiray abwaanka?
   Xaajiga wuxuu ku hadli jiray luuqada badan oo ay ka mid ahaayeen: Urdu, Faarisi iyo Hindi.
8. Dhowr ka qor cinwaanada gabayadiisii xusuusta reebay?
   Waxaa ka mid ah: Miyeydan aqoon diinta, Dilkii Sheikh Bashiir, Dardaaran, Halkii noolba calankii la baar, ubaxii dalkayagow iwm.
9. Sheeg xaaji Aadan af qalooc magaciisa oo saddexan?
   Waa xaaji Aadan Axmed Xasan.
10. Goormuu dhashay abwanka sanad ahaan?
    Wuxuu dhashay 1871 kii.
11. Imisa ayeey ujirtaa abwanka meesha uu ku dhashay magaalada ceerigabo?
    Waxay ujirtaa 50 km
12. Abwanka goobta uu ku dhashay jiho ahaan halkee kaga began tahay magalada?
    Waxay kaga began tahay dhanka woqooyi barri.
13. Goormuu xaajiga geeriyooday?
    Wuxuu geeriyooday 1986 kii.
14. Imisa sano ayuu jiray xiliga uu geeriyoonayay?
    Wuxuu jiray 115 sano.
15. Xaajiga reerkooda maxay ahaayeen?

    Waxay ahaayeen rer guraa.

16. Xaajiga imisa aya la dhalatay?

    Waxa la dhalatay 8 caruur.

17. Imisa bahood ayeey ahaayeen?

    Waxay aheeyeen 2 bahood. Abwaanka waxuu ahaa dhanka aaba waxuu ahaa yaraanka reerka. Dhanka hooyadana wuxuu ahaa curudka hooyadiisa.

18. Sheeg magaca la oran jiray hooyada dhashay abwaan xaaji aadan?

    Waxaa la oran jiray Dahabo Dhunkaal Dhega yare.

19. Abwaanka xiliga uu yaraa muxuu jeclaa?

    Wuxuu jeclaa xoola raacida, dadka waaween inuu ag fariisto hadaladoona dhuuxo

20. Imisa sano ayuu jiray abwaanka xiliga uu libaax qaadanayay?

    Wuxuu jiray 4 sano.

21. Libaax ma cunay abwaanka mise wuu iska tagay?

    Muusan cunin laakiin meesha ayuu ku dhiig baxay.

22. Abwaanka meesha yaa ka soo qaadaay?

    Waxaa ka soo qaadaay gabadh ari jir ah.

23. Immisa ayuu reerkii gabadha ari raaca ah la joogay?

    Wuxuu la joogay 3 bilood

24. Abwaanka xiligee buu afka ka qaloocday?

    Wuxuu afka ka qaloocday habeenki libaax qaadanayay.

25. Imisa sano ayu jiray abwaanka markii ay doonleeyda soo badbaadinayeen?

    Wuxuu jiray 9 sano

26. Imisa ayeey doonleyda haysteen abwaanka?

    Waxay haysteen 6 bilood

27. Raga doonleeyda ah tuuladee bay yimaadeen?

    Waxaay yimaadeen tulada la yirahda waqdara oo u dhexeysa maydh iyo las qoray

28. Ragii doonleeyda ahayd yeey tuulada kula kulmeen?

    Waxay la kulmeen oday la oran jiray cali gaacir

29. Yaa aqoonsadi abwaan markii uu ragii oo doonleeyda la socday?

    Waxaa aqoonsaday cali gaacir

30. Oday cali ragii doonleeyda ahaa muxuu ula soo baxay?
    Wuxuu ula soo baxay seef.
31. Yaa ka kaxeestay cali gaacir abwanka markuu ka reebay doonleyda?
    Waxaa ka watay abwaanka habaryartiisa. Wuxuuna ka dalbaday in mag laga siiyo wiilka
32. Imisa ayeey aheed magta la siiyay cali gaacir?
    Waxay ahayd 10 shilin
33. Imisa sano ayuu jiray abwaanka markuu dibada u dhoofayay?
    Wuxuu jiray 14 sano
34. Sheeg abwaanka inta dal uu tagay?
    Wuxuu tagay:
    b) Masar t) Suudaan j) Erateriya x) Urdun kh) Falastiin d) iiraan r)siiriya
    s) bakistan sh) jaad dh) Hindiya c) Yaman g) Jasiirada – java.
35. Sheeg abwaan xaaji aadan tarikhdiisa oo kooban
    Abwaanka waxa uu soo maray xiliyo adag balse alle wuu ka soo badbaadiyay waxaana ka mid ahaa:
    - maruu libax qaato
    - mar xabsi uu galo
    - mar xukun dil ah uu ka badbaado.
    - Mar badda laga soo badbaadiyo.
    - Mar madaxfurasho lagu soo furto.

36. Sheeg abwaanka suuganta uu tiriyay?
    Waxaa ka mid ah:
    - Kuwa dhiiri galin ah
    - Kuwo isku duubnida ka hadlaya.
    - Kuwa tusaale ah.
    - Kuwa gobanimo ah.
    - Kuwa aqoonta diinta ah.
    - Kuwa dar daaran ah.
    - Dilkii sh. Bashir.
    - Aqalka leegada.
    - Noolow calanka.
    - Ubaxii dalkeygow.
    - Hayin qalaad.
    - Afka hooyo baro.
    - Baroor diiq

37. Abwaanka xiliyadii ugu danbeeysay halkuu ku sugnaa?

    Wuxuu ku sugnaa muqdisho.

38. Halkuu ka shaqeenayay abwaanka xiliga uu joogay muqdisho?

    Wuxuu ka shaqeeynayay raadiyo muqdisho.

Isubeeg sharaxaada iyo erayada soo socda

Tiro	Sharaxaad		erayga
1.	Barwaaqo , ladnan	8	Beer
2.	Dayac, watataco	7	Beejo
3.	Nacs,barde baalo weyne baynaxmooye bir magooye	10	Beeddal
4.	Gaadiid bedeed doonta ka yar huurigana ka weyn	9	Beerdaro
5.	Kolka neefka gammaanka ahi in la kudo/kudaal u baahan yahay	3	Baynax
6.	Abbar,toos , aaddanaan, miis , qiyas	1	Beer
7.	Buuryo, baaro , baqbaqoa indhaha	2	Baylah
8.	Xubunta dhiiga sifeysa ee noolaha , beerta la fasho	6	Beeg
9.	Waa xubinta miirista iyo shandaynta dhiiga macaanka iyo dufinka badan ee nafaqooyinka kujira	5	Baydi
10.	Waa hawl laguu diray baylihin, wax laguu diray oo dhaliil ka soo baxday	4	beden

Isu doon maahmaayadaan qeybta 1 aad iyo 2aad

Tiro	Jooga koowad		Jooga labaad
1.	Geed laga dhacay	5	Looma godlo
2.	Geed waa madal	6	Godan
3.	Geed weyn waa gudin	9	Gacmo lalama tiigsado
4.	Geed yaraan lagu beero	8	Dameer baan leeyahay baa dhaanta
5.	Geel aan gawe loo hayn	7	Waxaa lagu waaq duraanta
6.	Geel ba’ow	4	Lixdan jir ku harsado
7.	Geel sibir	2	Inta joogtan waa marag
8.	Geel baan lahaan jiray	3	Yaa kuleh
9.	Geel wisil daaqay iyo gob nugul	1	Yar baa goysa

Keen erayadaan soo socda eraya la micno ah

Tiro	Eray la micno ah	Micno kale
1.	Il	Meel biyo laga shubto , xubin jirka ka mid ah
2.	Gar	Arin , xubin jirka ka mid ah
3.	Sur	Luqun , walax meel la surayo
4.	San	Dalaga yar yar , xubin jirka ka mid ah
5.	Kur	Buneeysi , madax
6.	Shin	Waqti , sid
7.	Mir	Soocid , kala bixin
8.	Doox	Jeexid , duleelin
9.	Far	Biyo mareen , xubin jirka ka mid ah

Casharka 11-aad: qorista sahanka

1. Odayga wiilashiisa muxuu kula taliyay?

   Wuxuu kula taliyay inuu gabadha uu gursanayo xujeeyo.

2. Maxay kula tahay in gabadha lugta laga xiro ayadoo caafimaad qabta, muxuu odayga ulajeeda?

   Wuxuu ula jeedaa in ay tahay gabadha mid raaliyo ah ama mid madax adag iney tahay

3. Maxay tahay murtida laga faa'idayo sheekadan?

   Waxaa laga faaida in guurka laga adkeeyo iyo qofka aad lawadaageyso noolasha

4. Waa maxay sahan?

   Sahanku waa hanaan lagu aruuriyo xogta si loo diyaariyo warbixin dhammestiran

5. Side sahanka loo diyaariyaa?

   Waxaa loo diyaariyaa ujeedo iyo amin loo bahan yahay

6. Sheeg waxyaabaha laga doonayo qofka sahanka sameenaya

   Waxaa laga doonaya:

   - Wareysi
   - Xog wareysi
   - Shir
   - Wada hadal
   - Cadeyn cida sahanka soo codsatay
   - In sahanka lafaln geeyo

7. Sheeg qaybaha sahanka leeyahay

   Waxaa ka mid ah

   - Tixrac sahan
   - Hilinka sahanka
   - Ararta sahanka
   - sahan
   - natijida sahanka
   - tolo bixin sahan

Isu doon maamahyadaan qeybta 1-aad iy qeybta

Tiro	**Jooga koowad**		**Jooga labaad**
1.	Inaad qalaysey	4	Xumaan laga fogaadaa
2.	Intaadan falin	8	Wadarta ma dibto
3.	Intaan dhibane hadlin	6	Quruuraxana waa jirey
4.	Inii ari foofi jiraa	7	Been baa u gaabisa
5.	Intii isku dan ah	9	Cuno yaa dhiiqaa
6.	Qaar intuu jirey	1	Anna wan qeybinayay
7.	Wax la cayriyo	3	Baa dheefqabe hadla
8.	Inti kali dhibta	5	Aya isku dad ah
9.	Irmaan wuxuu	2	Ka fiirso

Keen erayadaan soo socda lidkooda iyo erayo la micno ah

Tiro	Erayga	Lidkiisa	Eray la micnmo ah
1.	Aqoon baaris	Jahli	Aqoon laan
2.	Irmaan	Caano laan	Caano marann
3.	Guran	Cano badan	Aaran
4.	Maggow	Gaagax	Caano la,a
5.	Gaagax	Maggow	Buuxa
6.	Quus	Soo bixid	Soo muuqasho
7.	Cokan	Ooman	Haradsan
8.	Miid	Shilis	Ladan
9.	Marwo	Inan	Gabar
10.	Rajo	Quusasho	Niyo xumo

Ku same erayadaan soo socda weer

Tiro	**Erayo**	**Jibaax , xaab , abax, ijaab, xab , baji, baaji, abax**
1.	Warbixin	Xaji warbixinta
2.	Daacufle	Baji daacuflaha
3.	Muqdisho	Ijaab muqdisho
4.	Xawaal	Xab xawaaleha
5.	Liglig	Xaabi ligliga
6.	Kismayo	Ubax kismayo
7.	Hargaysa	U jibaax hargeysa
8.	Garoowe	Xaaji garoowe
9.	Baardhere	Abax baardhere

Casharka 12-aad: Shabeel naagood(5)

1. Yaa jillay ruwaayadii shabeela naagood qaybtaan?

   Waxaa jilay: b) diidan t) arday j) shabele x) sheikh kh) askari d) saaxiib.

2. Maxay diidan ruwaayada qaybtaan maxay ku jileeysan?

   Waxay ku jilleysay bare ama macalin.

3. Maxay illaalineysay diidaan markay arda ugu sheekeynesay shabeelka?

   Waxay bareysay inaysan ku kadsoomin shabeela naagood ka dig toonaadaan

4. Maxaa ku dhacay gabadha aamusneed ee diidan saddexda cesho u burisay?

   Waa gabar iskuulka in badan ka maqneed hadana casharka kalama socoto fikir un bey ku jirtaa

5. Xagee bay ukaxeeyeen shabeela nagood?

   Waxaa loo ka xeeyayxabiga.

6. Sheeg astaamana lagu garan karo shabeela naagood?

   Waxaa lagu garan karaa b) sasabasho t) been j) war badan

Sharax kooban ka bixi maahmaayadaan.

1. Kaluun isagaa la isku jillaabtaa

   Micnaha waa: waxaad baadi goobeyso ayagaa la isku sahmiyaa si aad sir bixiso

2. kan ku degaya kaama dheera.

   Micnaha waa: cadowgaaga kaama foga waa midka aad isku ceeshka tihiin

3. Kas waayeel kabbo isma dheera.

   Micnaha waa: qofka waayo araga ah waxa uu ogaal ku yahay ee kama ahan kam.

4. Kaligii cune kaligii buu dhintaa.

Micnaha waa: inla iskaashado oo aan kali oo socon oo wax la wada qabsado

5. Mardaboole afkuu kugu dhunkada ayuu kugu qaniina.

   Micnaha waa: bini aadan afkuu kugu amaanay buu kugu caaya sidoo kale waa ninaad kabtiisa toleeysid oo karfantaada tolaaya okale waayay.

Isubeeg sharaxaada iyo erayada soo socda

Tiro	Sharaxaad		Erayga
1.	Gardareysi	8	Daawe
2.	Galley ama masago la dubay ama la solay	6	Dabayaaqad
3.	Dukaan	3	Daas
4.	Bir laxooxda ama canjeerada lagu dubo	1	Daandaansi
5.	Daanyeerka weyn ee gaboobay	7	Dabagaalle
6.	Wax dhammaday intii ugu dambeysay , dabayaabo	9	Dabayl
7.	Tukasho	5	Daaxur
8.	Haraad	2	Daango
9.	Waa hawada ka dhacda meel furan oo aan huur laheyn	4	Dabaadi

Keen erayadaan soo socda likooda iyo eraya la micnon ah

Tiro	Erayga	Likiida	Eray la micno ah
1.	Maldah	Banana	Duur
2.	Lool	Dhigo	Mareedo qotomo(aqalka)
3.	Shilis	weyd	Caato
4.	Lug	Jeeni	Luqun
5.	Gabasho	Bareer	Toos
6.	Buur	arda	Darad

Keen erayadaan soo socda erayo la micno ah

Tiro	Eray	Micno kale
1.	Yaanyur	Bisad, mukulaal
2.	Qoor	Tun, neef jog leh oo lafo waaweyn
3.	Rug	Goob, xog
4.	Moog	Mar, jil
5.	Kab	Jaan,isku tolid walxo
6.	Xoor	Tuur , xayawaan u eg dabacadeeye
7.	Jir	Oogada sare ee noolaha , roob badan
8.	Masaar	Faas , godin
9.	Gambar	Walax lagu fariisto , kursi
10	Hal	Mid qura , neef xoola ah

Casharka 13-aad : soomaalidu ma istaqaan?

1. Sheeg waxa lagu garan karo dal jiritaankiisa?

   Waxaa lagu garan karaa

   b) In uu sooyaal leeyahay t) in uu soohdi leeyahay j) in uu qaran leeyahay

2. Haddii saddexdaan laga waayo dalka maxa dhacaya?

   Waxaa dhacaya in bulsahada siriq loo dhigo.

3. Yaa tiriyay heesta Soomaali baan ahay?

   Waxaa tiriyay abwaan c/qaadir xirsi yamyam.

4. Sheeg dadka soomaalida waxa lagu garan karo?

   Waxaa lagu garan karaa.

   - Dad dhaadheer.
   - Dhuudhuuban.
   - Maarin ah.
   - karti leh.
   - Hawl kar leh.
   - Bulsho la dhaqan.
   - Martin soor wanaagsan leh.
   - Go,aan adag
   - Faan badan
   - Deeqsi ah

5. Soomaalidu ma istaqaanaa?
   Haa way istaqaan.
6. Sidee lagu ogaan karaa qofka wax tarkiisa?
   Waxaa lagu ogaan karaa hab dhaqankiisa iyo deegaanka uu ku noolyahay
7. Maxaa loola jeeda? erayadaan ladnaan, abyan , buuxda
   Waxaa loola jeedaa:
   Ladnaan _____ waan caafimaad qabaa.
   Abyan _____ waa dhammeeystiran.
   Buuxda _____ waa ceegaagan
8. **Sidee suurta gal kutahay inaad bedesho dhaqamadaada?**
   Waxaad ku bedeli kartaa:
   b) inaad is xisaabiso t) inaad deegaanka bedesha
   j) inaad asxabta bedesho x) inaad waxbarato

keen erayadaan soo socda lidkooda iyo erayo la micno ah

Tiro	Erayga	Lidkiisa	Eray la micno ah
1.	Gashaanti	Guuris	Inan
2.	Adke	Hoore	Dareere
3.	Qoton	Gaasho	Barweyn
4.	Carruur	Barbar	Dhalinyaro
5.	Miigan	Jog	Istaag
6.	Fuursan	Kogsan	Qalafsan
7.	Dherer	Qaloocsan	Janjeera
8.	Bar	Guud	Dhammaan
9.	Negaadi	Gudub	Dhaafe
10.	Nabad	colaad	Dagaal

Casharka 14-aad: Ruwaayadii shabeel naagood(6)

1. Sheeg dabeesha usocoto dhanka ay doonta usocota maxaa la yiraahdaa?
   Waxaa la yiraahdaa makhoor
2. Sheeg dabeesha gadaal kaga timaado doonta markay socota waxa la yirahdo?
   Waxaa la yirahdaa rash
3. Sheeg tog ama lag ku taal gayiga Soomaalida jihada woqooyi markaad istaagto aad dareemeyso dhaxan, markaad ka istaagto jihada koonfureedna kuleel ah?
   Waa laagta lafo gure
4. Sheeg cidii ugu horeysay oo sheegta in cudurka duumada keento kaneecada?
   Waa Ameerika
5. Qofka wax odroosa maxaa kaloo loo yaqaanaa?
   Waxaa loo yaqaan abwaan ama saaliye.
6. Yaa jillaaya ruwaayada shabeele naagood qaybtaan?
   Waxaa jilayay
   b) diidan t) diidane j) gabdhihii fadhiyay x) raga fadhiyay kh) hobolada
7. Dowlada iyo dadweynaha wax ma isku tabiyaan?
   Haa. Waayo dowlad waa dad.
8. Yaa isleedahay ruwaayada way lahadleysaa?
   Waxay la hadleysaadumarka.
9. Ruwaayada xaalada la joogo ma is leedahay waa ay falgali kartaa?
   Haa waayo dumarka manta ayaaba ka daran ku wii hore.

Keen erayadaan soo socda lidkooda iyo erayo la micno ah

Tiro	**Erayga**	**Lidkiisa**	**Eray la micno ah**
1.	Hiirad	Fadhi	Sal dhigasho
2.	Curdin	Gahayr	Waayeel
3.	Ceeriin	Bisayl	Mututux
4.	Qurux	Fool xun	Fildaro

5.	Fadaro	Hodan	Hanti
6.	Tanaad	Sabool	Xoola yar
7.	Fur	Rar	Culaab
8.	Ab	Isir	Farac
9.	Wasaq	Mayran	Qubays
10	Fayoobi	Qandho	Jirro

Keen erayadaan soo socda erayo la micno ah

Tiro	Eray	Micno kale
1.	Oon	Haraad, biyo la,aan
2.	Qalo	Dayn, xoola bireyn
3.	Laxow	Xanuun, aadaar
4.	Qaali	Wax qiimo badan , maran
5.	Maan	Garaad, garasho
6.	Maal	Hanti, malax
7.	Lufluf	Haraadi, qaraabasho
8.	Luu`q	Wado ciriiri ah , qardo jeex
9.	Lis	Maalid,mindi af uyeelid
10.	Laf	Bur yar , wax adag oo ku dhex jira noolaha

Casharka 15-aad: yaa iska leh

1. Sheeg afar waxyaabood ee qofka si gaar ah u yeelan karo?
   Waxaa yeelan karaa b) magac t) qiyam (sharaf) j) hanti x) aragti
2. Sheeg saddex waxyaabood uu qoys yeelan karo?
   Wuxuu yeelan karaa b) reer t) ubad j) guri
3. Sheeg shan waxyaabood ee uu yeelan karo wadan?
   Wuxuu yeelan karaa b) qaran t) Deegan j) sooyaal x) soohdin kh) astaan
4. Sheeg lix waxyaabood ee ay dunida yeelan karto?
   Waxay yeelan kartaa
   b) xeer t) iskaashi j)soohdino x)dhaqan kh) ciidan d) dowlad
   Bulsho aan arimahooda ka tashan ma sii jiri karaan?
   Maya. Waayo waa dad kala dhantaalo waana laga dhax faaiideysanayaa
5. Ma ka qayb qaadan karaa af iyo dhaqanka wada jirka Soomaalida?
   Haa. Waayo bulshada waa iney afkeeda dhawrataa kuna dhowrataa suugaan ahaan
6. Ma jirtaa suugaan muujineysa afkaaga hooyo?
   Haa waa jirtaa waxaana ka mid ah
   Nina kuma aflaxo *** hadal dad kale u akhriyaaye
   Afahayeenka kuu sheegayaa*** waa adoo kala e.
   Inyar buu fahmay kuu sheegayaa *** kii aabii yiriye

7. Sheeg waxyaabaha keenaya inay bulsho burburto?

   Waxaa keena b) kala danbeen la'aan t) is ixtiraan la'aan j) fikir la'aan

8. Sidee dantaada gaarka ah ugu dhax heli kartaa danta guud?

   Waxaa ugu dhax heli kartaa inaad si niyad wanaag ah aad ugu adeegtid (waxbarida , caawinta)

9. Sidee ummad kujiri kartaa?

   Waxay ku jiri kartaa b) in ay ilaaliso soohditooda t) sooyaalkiisa j) dadkiisa

10. Yaa curiyay heesta aqal tiir laantii kaligis mataagnee?

    Waxaa curiyay xasan sh muumin.

11. Yaa curiyay heesta ninka guba dalkeena?

    Waxaa curiyay hobalada waabari.

12. Yaa curiyay heesta aboorkuba allaynku dhisa?

    Waxaa curiyay xaaji aadan af qalooc

<u>Isu doon maahmaayadaan qeybta 1aad iyo qaybta 2aad</u>

Tiro	**Jooga koowad**		**Jooga labaad**
1.	Nin kaa hadal badan	4	Midba marba la siibaa
2.	Ayax tag	3	Biyo fadhiyey kiciyaan
3.	Biyo socda	5	Kab laawe hara
4.	Mijo dhooqo	2	Eelana reeb
5.	Kab xume ma hare	1	Dhaxalka aabaha kula leh

<u>Keen erayadaan soo socda eraya la micno ah</u>

Tiro	**eray**	**Micno kale**
1.	Saxansaxo	Neecaaw qabow
2.	Soor	Hanti
3.	Xundur	Xudun
4.	Kaliil	Roobka da'a xiliga guga iyo dayr
5.	Qeyd	Dhul cabiran
6.	Gob	Geed dheer oo qodox leh oo miro macaan bixiya
7.	Gun	Salka
8.	Haatuf	Isgaarsiin
9.	Dabar	Xarig gaaban oo geela lugaha looga xero
10.	Gud	Geed gaaban oo miraha yicibta bixiyo

Keen erayadaan soo socda lidkood iyo erayo la micno ah

Tiro	Erayga	Eray la micno ah	lidkiisa
1.	Dabiici	Dhixir	Iska eyelid
2.	Dabeecad	Dhalan	Dhaqan
3.	Cibaado	Weyso	Dhadhaqasho
4.	Duco	Tadcaar	Taakuleen
5.	Salad	Tuko	Gaal
6.	Wuduu	Duraan	Dalmar
7.	Shar	Shush	Wanaag
8.	Deyn	Gashi	Sadaqo
9.	Naf	Rubad	Geeri
10.	Shukri	Mahad	Daafrid

Casharka 16-aad: miisaanka murtida gabayada

1. Caraboow muxuu ahaa?
   Wuxuu ahaa beeraleey.
2. Caraboow halkuu deganaa?
   Wuxuu dheganaa jilib.
3. Caraboow muxuu yiqiinay?
   Wuxuu yiqaanay xeerka beerleyda iyo xoolo dhaqatada.
4. Yaa curiyay maansada dhaqanka?
   Waxaa curiyay abwaan xasan xaaji cabduule ganeey
5. Halkuu ku dhashay abwaan xassan ganey?
   Wuxuu ku dhashay degmada bullaxaar.
6. Gormuu ku biiray abwaanka ciidamada xooga dalka soomaliya?
   Wuxuu ku biiray 1967 ciidanka kumaandooska.
7. Gormuu ku biiray baanbeydii janan daa'uud?
   Wuxuu ku biiray 1970kii.
8. Sheeg abwaanka waxayaabaha uu curiyay?
   Wuxuu curiyay
   b) gabay t) hees j) ruwaayad

Tiro	Magac guud	Magac gar	Magac u yaal
1.	Iskuul	Maxamed	Iyada
2.	Isbitaal	Yuusuf	Asiga
3.	Suuq	Saynab	Iyaga
4.	Wado	Xalimo	Adiga
5.	Masjid	Faarxa	Inaga

Casharka 17-aad: yaa tahay

1. Sheeg walax adag oo in qof aadanah fahmo ama barto?
   Waa libaax.
2. Sheeg waxyaabaha aad heysato waxa ugu qiimaha badan?
   Waa waqtiga.
3. Sheeg isbadelada ku yimaada qofka?
   Waxaa ku yimaada b) da'da t) muqaalka j) magaca x) kartida.
4. Sheeg sameynta uu qofku ku yeelan karo qoyska?
   Wuxuu ku yeelan karaa dhanka b) dhaqanka t) daraja j) waxqabadka.
5. Side dhibaatada lagu dharaan karaa dhirinkaraa?
   Waxaa lagu dharaan dhirinkaraa.
   - In dhibaatada la fahmo.
   - In la cadeeyo xalka la rabo in laga gungaaro.
   - In la qiimeeyo dhibaatada taagan.
   - In la daraaseeyo in arinka xal laga gaaro.
   - In la cabiro dareenka hadalada soo bax.
   - In goanku lagu dhawaaqo.
   - In la furo jidgooyooyinka dhibaatooyinka.
6. Maxay muhim utahay in qofku naftiisa barto oo fahmo?
   Waxay muhim utahay
   - Inuu qofku qaladkiisa garto.
   - Inuu qofka is xisaabsho
7. Side bay qofnimadaada ugu qaybqaadan kartaa xalinta dhibaatooyinka?
   Waxay ugu qeyb qaadan kartaa.
   - Inaad tahay qof lagu kalsoonyahay.
   - Inaad tahay qof bulshada agtooda magac ku leh.
   - Inaad tahay qof u olaleeyay nabad ku soo dabaalid dadka.
8. Side bay isku xiran tahay baahida iyo dareenka?

   Waxay iskugu xiran tahay hadba daqliga ku soo galo iyo maamulka naftaada waa kuwa is garab socda.

9. Maxaa keena in dhalinyarada asxaabtooda ah loo wadaagaan arimo badan aysan la wadaagin waalidkooda?
   - In ay waalidka iyo ubbadka aysan wax xiriir ah uusan ka dhaxeyn
   - In ay ka baqayaan waalidkooda kadib soo bandhigista warbixinta.
   - In aysan iska warhaaynin waalidka iyo ubadka.

Isubeeg sharaxaada iyo erayada soo socda

Tiro	Sharaxaad		erayga
1.	Socodka goronyada	5	Dallab
2.	Meel banana oo aan cidna joogin	4	Dalow
3.	Xariiq, diilin, jiitin	1	Daltabyo
4.	Qof u qaxay dhul fog oo aanu xog badan ka heynin	8	Dal dhoon
5.	Dalaabid , hawada , beyniga, socdaalka ka lunsan yahay	2	Daleel
6.	Ilinka labada hunguri eek an cuntada iyo kan neeftu ku kulmaan	9	Daluun
7.	Dhulka xooluhu cunto dheef leh ka helayaan	3	Daliig
8.	Hilow, boholyow	7	Dalsan
9.	Hadaan ama god dheer waa lidka joogga cabbir hoos aadayo	6	Dalqa

Keen erayadaan soo socda lidkooda iyo erayo la micno ah

Tiro	Erayga	Eray la micno ah	Lidkiisa
1.	Koox	kali	mid qura
2.	Horjooge	Dibjooge	Gadaal socod
3.	Afgarooc	Aftahan	War badane
4.	Kaftan	Muran	Dood
5.	Qosol	Qoonsi	Saluug
6.	Guud	Gaar	Gooni
7.	Gun	Baar	Fiid
8.	Danjir	Daljir	Difaace dal
9.	Shiiqsan	Foocsan	Qaloocsan
10.	Gadaal	Hore	Hagaan

Keen erayadaan soo socda erayo la micno ah

Tiro	Eray	Micno kale
1.	Bur	Budo cad
2.	Dacar	Dhismo weyn
3.	Dhan	Cabid wax dareera
4.	Dub	Saynta xoolaha
5.	Dir	Qof in meel loo diro
6.	Dul	Meel duleelsan
7.	Gun	Salka geedka
8.	Duud	Dusha ama dhabarka
9.	Dug	Wax dhamaaday
10.	Duul	Dad badan

Cashirka 18-aad: Sheekooyin Murtiyeed

1. Sheeg 8 agab ee loogu adeegsado waxbarashada?

   Waxaa ka mid ah

   b) qalin t) buug j) jeesto x) miis kh) kursi d)sabuurad r) mastrad s) tirtire

2. Boqorku halkuu katalin jiray?

   Wuxuu ka talin jiray meel badd ka tolowsan

3. Boqorku muxuu adunka ugu jeclaa?

   Wuxuu ugu jeclaa buugaagta.

4. Boqorku halkuu ufasax qaatay?

   Wuxuu u fasax qaatay maji baxsi dhulka miyga.

5. Boqorku halkuu fariistay markay qoraxdu ku soo kululaatay?

   Wuxuu fariistay geed hostii.

6. Boqorku muxuu jeebka kuwatay?

   Wuxuu kuwatay buug.

7. Muxuu boqorku soo xasuustay markuu soo socday imayl iyo xoogaa?

   Wuxuu soo xasuustay buugiisi uu geedka uga soo tagay.

8. Boqorkii ma ulabtay buugii?

   Maya, wuu ka laba shakiyay.

9. Boqorkii yuu arkay?

   Wuxuu arkay wiil yar oo shimbiro ilaalinaya.

10. Muxuu boqorkii wiilka ka codsaday?

    Wuxuu ka codsaday inuu buuga udoono, waxaan ku siinayaa lacag dahab ka sameysan.

11. Wiilkii muxuu boqorkii ku yiri?

    Wuxuu ku yiri hadii aan kuu doono shimbirahaan aya iga cararayo?

12. Boqorkii muxuu wiilka ugu jawaabay?

    Wuxuu yiri boqorka aniga aya kuu ilaalinaya.

13. Wiilkii muxuu boqorka udhibay?

    Wuxuu udiibay shaabuug.

14. Shimbirihii maxay ogadeen?

    Waxay ogaadeen inuu maqan yahay wiilka.

15. Shimbirihii halkee u carareen?

    Waxay u carareen dooxada kadibna waxey galeen beer dad lee yihiin oo khudaar wayna cuneen

16. Wiilka goormuu soo labtay?

    Wuxuu soo laabtay 1 sac kadib.

17. Wiilkii markuu keenay buuga muxuu boqorka ku yiri?
    Wuxuu ku yiri waan umaleynayay iney sidaan dhaceyso oo shimbiruho tagayaan.
18. Wiilki muxuu boqorkii siiyay?
    Wuxuu siiyay labo lacag oo kala ah mid uu buuga uga balan qaaday iyo mid qaladka uu sameeyay ahaa.
19. Sheeg maahmaahda uu usoo qaatay boqorka
    Wuxuu usoo qaatay
    Sadex baa madextinimada kaa qaada
    - Gar weecan
    - Gudoon jilicsan
    - Gacan guracan
20. Sheekada uu wiilka usoo qaatay boqorka maxay ahayd?

    Waxay ahayd boqor naxariis daran.

21. Adoonkii baxsadka ahaa yaa godka ugu soo galay?

    Waxaa ugu soo galay libaax.

22. Libaxa muxuu wiilka ka codsaday?

    Wuxuu ka codsaday inuu qorraxda ka baxsho.

23. Libaax muxuu sameeyay markii qoraxda laga saaray?

    Wuxuu sameeyay wuu farxay, seenta bilig bilig ka siiyay, gacantana wuu ka dhunkaday.

24. Imisa ayey libaaxa iyo wiilka isla noolaayeen?

    Waxay isla noolaayeen 3 sano.

25. Addoonka goormee qabteen ilaaladii boqorka?

    Waxay qabteen xili uu majaxsi usoo aaday kaymaha dhaxdooda.

26. Wiilka muxuu boqorka ku amray?

    Wuxuu ku amray inaskartu xirxirato, Lana daldalo.

27. Wiilka yaa lagu soo fasaxay?

    Waxaa lagu soo fasaxay libaax gaajeesay si uu u cuno

28. Libaaxa siduu ahaa?

    Wuxuu ahaa:

    Libaax weyn

    Indho cas cas

29. Libaax muxuu adoonkii ku sameyay?

    Wuu dhunkaday, wuuna ag fariistay

30. Addoonkii isagana muxuu sameeyay?

    Wuxuu sameeyay wuu usalsalaaxay dusha.

31. Muxuu sameeyay markuu arkay libaaxi iyo adoonkii oo hishiis ah?

    Wuu amakaagay wuxuuna yiri wiilow manta ka dib xur baad tahay meeshiina iska mushaaxa

32. Maxay tahay dulucda sheekada?

    Waxay tahay hadii aad abaal qof ugasho in mar un kuu abaal gudayo.

33. Labada sheeko ma dhabaa mise waa dhalanteed?

    Waa dhab waana wax dhacay.

34. Sheeg afar astaamood oo looga baahanyahay hogaamiyaha

    Waxaa ka mid ah:

    - In uu naxariis leeyahay
    - Inuu deeqsi yahay.
    - Inuu dadka ukala eexan.
    - In uu dulqaad leeyahay

<u>Isubeeg sharaxaada iyo erayada soo socda</u>

Tiro	**Sharaxaad**		**Erayga**
1.	Naysha ama wanka yare ee hooyadu ka dhimatay ee idaha kale loo dhigo	6	Heemaal
2.	Waa daruurta casha ku soo saartay ee badan xambaarsan	8	Heensaraar

3.	Gole, madal, ardaa	5	Heellan
4.	Miraha geedka higlada	3	Heeraar
5.	Qof inuu wax qabto u diyaar ah	9	Heel
6.	U eg , u ekaansho hidde keeno, hab sami iyo qaab wanaagsan	1	Heeco
7.	Fuudka dufanka kore ee yimaada hilibka ama lafaha la kariyo	10	Hebed
8.	Waa tiir farraaro leh oo aqalka gudihiisa laga taago oo yacayga lagu dul sameeyo si saabaanka guriga laa saaro	2	Heego
9.	Wa deyr, xero, meegaar, ood la isku wareejiyey si col la isaga dhawro	4	Heeli
10.	Dhaaqo, aan waxba diidin , wax kasta ogol	7	Heen

Keen eryadaan soo socda lidkooda iyo erayo la micno ah

Tiro	Erayga	Lidkiisa	Eray la micno ah
1.	Tur	Dibindaabyo	Khayaano
2.	Gaal	Muslim	Toosan
3.	Gob	Gun	Jirid
4.	Dhereg	Gaajo	Baahi
5.	Dhaxan	Dugsi	Gabaad
6.	Murti	Yoonyoon	War badane
7.	Khasaare	Faa,iido	Dheef
8.	Cir	Dhul	Meer
9.	Dhiig	Malax	Dheecaan midib cad leh
10	Webi	Haro	Waro

Keen erayadaan soo socda erayo la micno ah

Tiro	Eray	Micno kale
1.	Baad	Cuno, raashiin
2.	Balambal	Dash, ardaa
3.	Bal	Geed galeyda iyo mesegada ka soo hara
4.	Aar	Libaaxa labka , aar gudasho
5.	Jaan	Saanta kabaha, jinni
6.	Dhan	Kuli,cab
7.	Qaranqaaro	God , bohol yar
8.	Aroori	Xoola biyo siin, qof seexin
9.	Waayo	Xili hore, bari samaadkii
10.	Asal	Unkamid, midib af uyeelid

END